

# Minnesota Truth Council

FOOMKA OGGOLAANSHAHA



The Advocates  
FOR HUMAN RIGHTS

**Sheekadaada waa muhiim.** Waad ku mahadsantahay xiisaha aad u qabto inaad Golaha Guddoomiyaha ee Diiwaangelinta Xaqiiqada Hawlgalka Metro Surge iyo Hawlgalka PARRIS (Golaha Xaqiiqada ee Minnesota) la wadaagto sheekadaada ku saabsan wixii aad la kulantay ama aad markhaatiga ka ahayd intii lagu jiray hawlgallada la xoojiyay. Ka qaybqaadashadaada wada hadalkan waa ikhtiyaari gebi ahaanba. Waxaad xor u tahay inaad ka gudubto su'aal kasta oo uu ku weydiyo ururiyaha sheekada ama aad joojiso wada hadalka wakhti kasta. Waxa kale oo aad la wadaagi kartaa macluumaad kasta oo aad u aragto inuu muhiim yahay, xataa haddii aanu ururiyaha sheekada ku weydiin.

**Macluumaadka aad bixiso waxaa loo tixgelin doonaa diiwaan dadweyne, taas oo macnaheeda yahay in la shaacin karo haddii si rasmi ah loo codsado iyadoo la raacayo Cutubka 13 ee Xeerarka Gobolka Minnesota. Waxaad dooran kartaa inaad sheekadaada si qarsoodi ah u bixiso haddii aadan doonayn in si fagaare ah lagu aqoonsado, balse aad rabto in sheekadaada lagu daro. Fadlan la wadaag oo keliya macluumaadka aad ku qanacsan tahay in uu noqdo mid dadweyne.**

## Muxuu Golaha Xaqiiqada ku samayn doonaa sheekadayda?

Dhammaan sheekooyinka iyo macluumaadka kale ee loo ururiyo Golaha Xaqiiqada ee Minnesota waxaa lagu kaydin doonaa adeeg kayd ammaan ah oo ay martigeliso shirkad qareenno. Qofka ururinaya sheekadaada ma hayn doono duubista ama qoraallada uu ka sameeyo sheekadaada. Golaha Xaqiiqada ee Minnesota wuxuu sidoo kale isku dayi doonaa inuu ka saaro magacyada dadka kale ee aad ku xusto sheekadaada, maadaama aanay iyagu oggolaan inay sheekadooda la wadaagaan. Sheekadaada waxaa dib u eegi doona oo falanqayn doona Golaha Xaqiiqada ee Minnesota marka uu diyaarinayo warbixintiisa ku saabsan wixii ka dhacay Minnesota.

## Maxaa ku dhici doona sheekadayda marka Golaha Xaqiiqada ee Minnesota uu soo gabagabeeyo shaqadiisa?

Golaha Xaqiiqada ee Minnesota wuxuu ku talin karaa in gobolka sameeyo kayd dadweyne oo ay ku jiraan sheekooyinka iyo macluumaadka kale ee la xiriira tallaabooyinka fulinta sharciyada socdaalka ee dowladda federaalka. Kaydka waa ururin xog iyo sheekooyin toos ah oo ku saabsan mowduuc gaar ah. Haddii taasi dhacdo, sheekadaadu waxay ka mid noqon doontaa kaydkaas dadweynaha.

## Waa maxay khataraha ka dhalan kara ka qaybqaadashada?

Waxaan aqoonsanahay in la wadaagista sheekadaada Golaha Xaqiiqada ee Minnesota ay yeelan karto khataro. Adiga ayaa dooranaya xogta aad rabto inay qayb ka noqoto diiwaanka taariikhiga ah. Waxaa laga yaabaa inaad haysato macluumaad adiga ama xubnaha kale ee bulshada gelin kara khatar la xiriirta arrimo sharci, socdaal, ama dhibaatooyin kale. Waxaad yareyn kartaa khatartaas adigoo aan la wadaagin macluumaadkaas ama adigoo sheekadaada si qarsoodi ah u gudbinaya.

Waxaan sidoo kale aqoonsanahay in wadaagista macluumaad shakhsiyeed ay keeni karto cabsi ama welwel, ha noqoto marka laga hadlayo falalka wakiillada federaalka guud ahaan ama waayo-aragnimadaada gaarka ah. Xusuusnow inaad joojin karto ururinta sheekadaada wakhti kasta. Liiska adeegyada lagu gudbiyay ee lagu siiyay bilowga waxa kale oo ku jira ilo bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka dhimirka.

# Minnesota Truth Council

FOOMKA OGGOLAANSHAHA



The Advocates  
FOR HUMAN RIGHTS

## Oggolaanshaha iyo heerka qarsoodiga

Marka aad sheeko u gudbis Golaha Xaqiiqada ee Minnesota, waxaad oggolaanaysaa in sheekadaada loo isticmaalo warbixinta uu Golaha soo saari doono bisha Diseembar 2026. Golaha Xaqiiqada ee Minnesota waxa kale oo uu u adeegsan karaa sheekadaada go'aaminta mawduucyada kulamada dadweynaha. Adiga ayaa dooran kara in sheekadaada lagu soo bandhigo adigoo magac qarsoon wata ama **magacaaga** lagu xuso.

|                      | Sidee magacayga loo isticmaali doonaa?                                                                                                                                                                                                                               | Ma ka noqon karaa oggolaanshahayga?                                                                                                                                                       | Ma la soo xigan karaa sheekadayda?                                                                                                                                 |
|----------------------|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| MAGAC QARSOON        | <p>Ma jiri doonto wax xiriir ah oo u dhexeeya magacayga iyo sheekadayda.</p> <p>Qofka ururinaya sheekadayda wuxuu hayn doonaa magacayga oo keliya si loogu fududeeyo jadwalka, balse laguma xiriirin doono sheekadayda mana lala wadaagi doono Golaha Xaqiiqada.</p> | <p>Maya. Maadaama sheekadayda aan lagu xiriirin doonin magacayga, ma awoodi doono inaan dib u helo ama ka saaro.</p>                                                                      | <p>Sheekadayda waxaa lagu soo bandhigi doonaa oo keliya qaab kooban ama dib-u-sheegid ah, iyada oo aan lagu darin wax macluumaad shakhsi ahaan ii aqoonsanaya.</p> |
| MAGAC AAN QARSOONEYN | <p>Magacayga waxaa lagu xiriirin doonaa sheekadayda, waxaana suuragal ah in si dadweyne loo shaaciyey.</p>                                                                                                                                                           | <p>Haa. Waxaan beddeli karaa oggolaanshahayga ama waxaan dooran karaa inaan noqdo qof magac qarsoon wata, balse ma awoodi doono inaan sheekadayda ka saaro agabka hore loo shaaciyey.</p> | <p>Sheekadayda si toos ah ayaa loo soo xigan karaa, waxaana ku jiri kara macluumaad si shakhsi ahaan ii aqoonsanaya.</p>                                           |

Fadlan xaqiiji heerka qarsoodiga aad dooranayso inta lagu jiro hawlaha Golaha Xaqiiqada ee Minnesota:

- ☐ **Sheeko magac qarsoon:** Ma doonayo in magacayga si kasta loogu xiriiriyo sheekadayda.
- ☐ **Sheeko magac la xusay:** Kuv pom zoo kom kuv lub npe txuas nrog kuv zaj dab neeg, thiab kuv tso cai rau Minnesota Truth Council siv kuv lub npe hauv cov ntaub ntawv tshaj tawm rau pej xeeem los sis caw tau kuv tuaj hais lus hauv cov rooj sib tham rau pej xeeem.

Waad ku mahadsan tahay inaad la wadaagtay sheekadaada si aad uga caawiso Golaha Xaqiiqada ee Minnesota inuu abuurdo diiwaan taariikheed oo muhiim ah oo ku saabsan wixii dadka reer Minnesota ay la kulmeen intii lagu jiray Hawlgalka Metro Surge iyo Hawlgalka PARRIS. Sheeko kasta waa muhiim!

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la xiriir Golaha Xaqiiqada ee Minnesota adiga oo iimayl u diraya [MNTruthCouncil@advrights.org](mailto:MNTruthCouncil@advrights.org) ama la xiriir qofka ururinaya sheekadaada.